



## Xuquuqda Bukaan-Socodka

Haween badan ayaan aqoon u lahayn xuquuqda ay ku leeyihin nidaamka daryeelka caafimaadka.

Markii ad bukaan-socod tahay, waxaad leedahay xuquuq sharci ah oo ku salaysan sharciga Kanada iyo go'aamada maxkamadda.

### **Markii ad bukaan-socod tahay, waxaad xaq u leedahay:**

- in uu kula joogo qof saaxiibkaa ama qoyskaaga ah markii ad leedahay ballan iyo baaritaan
- in laguu daaweyo si sharaf iyo xurmo leh
- in aad su'aalo ka waydiisid jirradaada iyo caafimaadkaaga
- in fasiraad wanaagsan oo ad fahmi kartid lagaa siiyo cudurka ku haya
- in aad ka aragti duwanaatid takhtarkaaga
- in aad ka heshid ra'y'i labaad meel kale
- in aad maya tiraahdid ama diidid daawayn
- in aad aragtid, akhrididna qoraalada caafimaadkaaga
- in arrimahaagu kuu ahaadaan sir iyo qarsoodi
- in aad go'aamisid mustaqbalka caafimaadkaaga

## **DCB waa mashruuc gaarsiin oo haweenka bara xuquuqda ay ku leeyihii nidaamka daryeelka caafimaadka.**

### **Ujeeddooyinka Mashruuca DCB:**

- siinta wararka caafimaadka, xuquuqda bukaan-socodka, iyo taageeridda haweenka
- caddaynta dhibaatooyinka iyo arrimaha waawayn ee haweenka ka haysta nidaamka daryeelka caafimaadka
- caawimidda haweenku in ay noqdaan kuwa ku xeel dheer, go'aamiyana arrimaha caafimaadkooda

### **Sidee Baan Ujeeddooyinkaas Uga Guul-gaarnaa?**

Beelaha oo la booqdo, haweenkana lala wadaago wararka ayadoo la qabanayo tababarka Xuquuqda Bukaan-socodka.

Tababarka Xuquuqda Bukaan-socodku wuxuu haweenka u suurta galinaya in ay helaan aqoon ku saabsan xuquuqdooda, bartaanna waxa uu yahay daryeel caafimaad oo xushmad lihi, iyo xirfado ay naftooda wax ugu qabsadaan.

**Haweenka oo si cad ugu doodaya daryeel caafimaad oo ku habboon, xushmad leh, badbaadana qaba oo ay haweenku helaan.**

Wixii warar saa'id ah, fadlan kala xiriir Isku-duwaha Mashruuca u Doodidda Caafimaadka Beesha (604)736-4234.

Mashruuca DCB waxa maal-galiyay Guddiga Caafimaadka Vancouver/Richmond (Vancouver/Richmond Health Board)